REGION JÄMTLAND HÄRJEDALEN



# Kusoo dhawow gobolka Jämtland Härjedalen!

Macluumaadka laguugu talogalay adiga oo imika yimiday Sweden iyo Jämtland or Härjedalen oo u baahan inaad la xidhiidhid daryeelka caafimaadka ama daryeelka ilkaha.

## Markaad timaadid Sweden adoo magan-galyo doon ah ama muhaajira cusuba, waxa lagu siinaya baadhitaan caafimaad oo bilaasha

baadhitaanka caafimaad waxa la sameeya isla marka aad timaadid Sweden. Haddii aanad haysan ogolaansho deganaansho saxa ama aad ku nooshay is qarin waxaad sidoo kale xaq u leedahay baadhitaan caafimaad oo bilaasha.
Baadhitaanka caafimaad waxaad kula kulmi doontaa dhakhtar ama kalkaaliso. Waa inaad kala hadashaa caafimaadkaaga oo baadhitaan la bixiyo si loo fiiriyo inaad leedahay wax caabuq xanuuno ah. **Baadhitaanka caafimaad waxa loo sameeyaa si aad u heli kartid daryeelka iyo daaweynta aad u baahan tahay.** Waxaad **sidoo kale heli doontaa macluumaadka khuseeya shaqada daryeelka caafimaadka. Baadhitaanka caafimaad waxa sameysa xarunta caafimaad ee kuu dhow.**
Waxaad ku heli doontaa iimayl bandhigista wakhtiga baadhitaanka caafimaadkaaga. Waxaad sidoo kale wici kartaa **xarunta caafimaadkaaga** si aad u qorsheysid balanta haddii aanad helin bandhi oo aan horey laguu baadhin.

## Xuquuqda daryeelka caafimaadka iyo daryeelka ilkaha

**Waayeelka magan-galyo doonka**, ka weyn 18 sano jir, waxay xaq u leeyihiin daaweyn xaaladaha degdega iyo daryeelka ilkaha, daryeelka dhalmada, kalatalinta ka hortaga uurka, ilmo xaaqida, daryeellka marka loo eego Xeerka Xanuunada la Isqaadsiiyo, iyo daryeelka dhakhtiirta ama helitaanka ilkuhu waxay hortagi karaan xaalado xanuuno khatara. Daryeelka caafimaadka ee bilaashaka waxa laga bixin doonaa liiska qiimaha gaarka ah, oo ka yar lacagta caadiga ee bukaanka.
**Caruurta magan-galyo doonka** iyo dadka ka yaryar da'da 18 waxay xaq u leeyiihiin daryeel caafimaad iyo daryeel ilko oo la mida dhamaan caruurta ku nool Sweden.
Haddii lagu siiyey **ogolaansho deganaansho**, waxaad xaq u leedahay daryeel caafimaad iyo daryeelka ilkaha oo la mida ka muwaadiniinta dhamaan Sweden. Daryeelka waxa lagu bixiyaa iyadoo lagu saleynaayo baahida daryeelka iyo deganaayasha isagoo qiimo caadiya ah. Dadka degan ee wali ku jira guryaha Golaha Muhaajiriinta Sweden bixiyey, lacagtu way qabanaysaa iyagoo magan-galyo doon ah marka lasoo qaato kaadhka LMA. Daryeelka caafimaad waxa lagu bixiyaa bilaa lacag ilaa cunugu gadho da'da 18. Daryeelka caafimaad waa bilaash ilaa da'da 23 ka dib marka loo eego heerka daryeelka ilkaha ee hada.
Haddii aanad awoodin inaad ku ilaalisid balantaada adeega caafimaadka ama daryeelka ilkaha, **waa inaad joojisaa marka horeba**, haddii kale waxa lagaa qaadi doonaa lacagta xataa haddii aanad iman halkaas.

## Haddii aad u baahan tahay turjumaan

Waxaad markasta xaq u leedahay turjumaan markaad la xidhiidhid daryeelka caafimaad iyo daryeelka ilkaha. Waxa muhiima inaad timaadid xarunta caafimaadka, cisbitalaka ama daryeelka ilkaha wakhti wanaagsan, turjumaan ka waa laguu balaminayaa booqashadaada wakhtigaasi.

## Waajibaadka Qarsoodiga

Khubarada daryeelka caafimaadka iyo turjumaanadu waxa waajib ka saaran yahay. Macneheedu waa in aanay macluumaadka adi ku khuseeya u sheegin qofkale ama u fasixin ogolaanshahaaga la'aantii.

## Markaad raadinaysid daryeelka caafimaadka, daryeelka ilkaha ama iibka caafimaadka

Haddii macquul tahay, **markasta keen** kaadhka aqoonsiga, dukumenti aqoonsiga ee Wakaalada Cashuurta Sweden, magan-galyo doonka, kaadhka LMA ama baasaaboorka cadeynaya aqoonsigaaga.
Haddii anaad haysan lambarka aqoonsiga gaarka ah ee Iswidhiska, waxaad heli doontaa lambarka bukaanka marka hore ee aad raadisid daryeelka Jämtland or Härjedalen. Lambarka waa in la kaydiyaa oo aad qaadataa markaad raadinaysid daryeelka marka danbe, Haddii aad lumisid lambarkaaga bukaanka, waa inaad sheegtaa macagaaga iyo taariikhda dhalashada marlabaad.

## Socdaalka Daryeelka Caafimaadka

Waxaad masuul ka tahay socdaalka tagista iyo ka imaanshaha daryeelka caafimaadka iyo daryeelka ilkaha. Dookha koobaad ee socdaalku waa bas, tareen ama gaadhi gaara markaad u safraysid ama ka imanaysid daryeelka caafimaadka. Waxa dib laguugu celin doonaa qeyb ka mida kharashka socdaalkaaga ka dib intaasi. Kaydso rasiidhada oo weydii bixiyaha adeeg daryeelka caafimaadka ee saocdaalka.
Waxbadan ka akhri dibu bixinta lacagta http://ltr.se/fardtjanst-sjukresor/sjukresor/
Haddii adigu sabab uun ay kuugu adkaato inaad heshid adeeg daryeelka caafimaadka, waxa marmarka qaar xaq u leedahay socdaalka daryeelka caafimaadka taksi ahaan. **Shaqaalaha caafimaadka ayaa qiimeeya cida xanuusanaysa inay u baahan yihiin taksi.**
Qaraabada waxay kaliya kugula safri karaan taksi haddii shaqaalaha caafimaadku go'aamiso inaad xanuusanaysid oo aad u baahan tahay caawimo iyo daryeel qaraabo. Waxaad bixin kartaa kharashka dirawalka taksiga ka hor socdaalku intaanu bilaabin.
**Waxaad masuul ka tahay diyaarinta safarka kusoo noqoshada gurigaaga** oo bas ah, tareen ama gaadhi gaara ilaa shaqaalaha caafimaadku haddii kale go'aamiyaan. Tani sidoo kale waxay qabanaysaa haddii aad kusoo noqotid daryeelka caafimaad oo taksi ah ama anbalaas ah.

## Haddii aad u baahan tahay talo daryeel caafimaad

Waxaad kala hadli kartaa kalkaalisada adoo wacaaya **lambarka tilifoonka 1177.** Kalkaalisadu waxay ka jawaabi kartaa su'aalaha, ku siin kartaa talo, qiimeyn kartaa in aad u baahan tahay daryeel caafimaad ama in kiisku kusii caawiyo. **Waxaad wici kartaa 1177 wakhti kasta maalinta.**

## Haddii aad raadinaysid macluumaadka daryeelka caafimaad

Ee **www.1177.se** waxa jira qoraalo khuseeya xanuunada, xanuun, baadhitaano ama daaweyno. Inbadan qoraalada waxa loo turjumay luuqado kala duwan.

## Miyaad xanuusanaysaa ama leedahay dhibaatooyin caafimaad?

Haddii aad leedahay dhibaatooyin caafimaad oo aan u baahnayn daryeel degdega oo cisbitaal, waa inaad caawimo ka raadisaa xarun caafimaad. Xarunta caafimaadku waxay furan tahay 08:00 iyo 17:00 todobaadkasta. Si aad ula kulantid dhakhtar ama kalkaaliso, waa inaad sameysaa balan. Waxa jira xarumo caafimaad oo bixiya shaybaadho bilaa balan ah wakhtiyo gaara.
**Macluumaadka xidhiidhka xarunta caafimaadka/qaranka adeega caafimaadka ilkaha:**

## Haddii aad aad u xanuusatid ama dhaawacantid

Haddii aad si dhakhso ah uga cabatid xanuun daran ama dhaawac shil, waa inaad tagtaa xarunta daryeelka degdega ee Cisbitaalka Östersund. Xarunta daryeelka degdega waxay u furan tahay 24 saac, maalinkasta.
Lambarka tilifoonka xaaladaha degdega ah waa 112.
**112 waa lambarka xaaladaha degdega waxaana kaliya loo isticmaali karaa haddii uu jiro dhib degdega oo nololeed.**

Haddii aad tahay magan-galyo doon oo lagu dhigay Cisbitaalka Östersund, waxa aad u muhiima in adiga ama mid ka mida shaqaaluhu ogeysiiyo Golaha Socdaalka Sweden.

## Haddii leedahay xanuun ilkaha

Haddii aad u baahan tahay daryeel degdega oo ilkaha (haddii aad leedahay xumad, barar, xanuun ama heshay afka wax kaaga dhaceen), waa inaad wacdaa adeega daryeelka caafimaadka qaran khadka tilifoonka 063-15 33 00. Si aad ula kulantid dhakhtar ilkaha ama kalkaaliso, waa inaad sameysaa balan.

## Haddii aad u baahan tahay inaad la hadashid qof

Dhibaatooyinka maskaxda ee sahlan, waa inaad la xidhiidhaa xarunta caafimaadka. Kuwani waxay noqon karaan dhibaatoyin sida adkaansho hurdada ah, warwarka ama falcelita dhibaatooyinka iyo murugada.

Haddii aad xoog u dareemaysid xanuun maskaxeed oo daran oo aad u baahan tahay **caawimo degdega** waxaad la xiriir kartaa waaxda daryeelka maskaxda ee Cisbitaalka Östersund. Lambarka Tilifoonka: 063-15 32 50
Waxaad wici kartaa markasta 1177 si aad caawimo u heshid.

## Haddii aad tahay ama qaadid uur

Baadhitaanada xaamalida waxa laga iibsan karaa dhamaan farmasiiyada iyo dukaamada. La xiriir xarunta daryeelka sida ugu dhakhsaha badan markaad ogaatid inaad tahay xaamilo. Xarunta caafimaadka waxa jira shaybaadh daryeel caafimaad xaamilo/umuliso. Waxaad xaq u leedahay baadhitaano joogto ah oo umulisada. Haddii ay daruuri tahay, waxa laguu gudbin doonaa dhakhtar. Waxaad heli doontaa macluumaadka ka hor dhalashada cunuga, daryeelka caafimaadka inat lagu jiro dhalmada iyo baadhitaanada adiga iyo ilmaha yar ka dib dhalashada. Waxaad sidoo kale heli kartaa qalabka ka hortaga uurka. Maaha inaad bixisid wax lacag daryeelkan.

## Ilmo Xaaqida

Marka loo eego sharciga Sweden, dumarku waxay go'aansanayaan inay iskasoo xaaqaan ilmaha iyo inkale. Waxaad sidoo kale la xidhiidhi kartaa xarunta caafimaadka ama wici kartaa 1177 oo qof ayaa kusii caawin doona.
Dumarka raadinaaya talada ilmo xaaqistu waxay balansan karaan shaybaadha ilmo xaaqista ee cisbitaalka Östersund. Balanta waxa laga sameyn karaa Shaybaadhka Dumarka, lambarka tilifoonka 063-15 39 30 ama 063-15 35 93.

## Xarunta daryeelka caafimaadka

Xarunta daryeelka caafimaadka cunuga, caruurta da'doodu tahay 0–5 waxa la siinayaa booqasho balamo joogto ah oo baadhitaano iyo dalaalo leh. Korniinka caruurta iyo caafimaadka waa lala soconayaa. Adigu waalid ahaan waxaad heli doontaa caawimo iyo talo. Booqashooyinka xarunta caafimaadka cunugu waa mutadawacnimo waana bilaa lacag. Dhamaan caruurta booqda xarunta caafimaadka cunugu waxay heli doonaan booqashooyin balansan. Waxaad la xidhiidhi kartaa xarunta caafimaadka markasta oo aad waalid ahaan aad su'aalo ka qabtid cunugaaga ama su'aalo waalid ahaana.

## Daawada

Daawada magan-galyo doon ahaaan laguu qoray waxa lagaga iibsan karaa farsamiiyada qiime hoose. Waxaad bixinaysaa qiimaha oo dhameystiran dhamaan daawooyinka iyo alaabaha.

## Ilaalinta Kharashka Sare

Kuwiina haysta ogolaansho deganaansho, waxa jira ilaalin kharasha caafimaad, daryeel caafimaad iyo kharashaad farmasi.
Magan-galyo doonka waxa la siin karaa damaanada Golaha Socdaalka Sweden kharashaadka aanad ka heli karin lacag dibu celinta meelkale. Kaydi dhamaan rasiidhada aad heshid markaad booqatid daryeelka caafimaad ama daryeelka ilkaha, iibsanaysid daawo laguu qoray ama safarka daryeelka caafimaadka. Golaha Socdaalka Sweden ayaa ku siin kara macluumaad badan.